

# Jadeecada, Qaamo-qashiirta & Jadeeco jarmal (MMR): Warqada xaqiiqda

Waxaa dhawaan ka dillaacay xanuunka jadeecada gudaha Wales, waxaana hadda jira xanuuno ka dillaacay Birmingham iyo London

## Jadeecada:

- Jadeecada waxay ka mid tahay **xanuunka ugu faafida badan adduunka**. Haddii hal qof uu ku dhaco, 9 ka mid ah 10 ka mid ah qoyskooda iyo saaxiibadooda ee aan la tallaalín ayaa xanuunkan qaadi karaan.
- Jadeecada waxay noqon kartaa **mid aad ka khatarsan finanka**. Waxay keeni kartaa dhibaatooyin aad u daran sida arag beel, maqal beel, oof wareen, [mininjaatis] xanuun maskaxeed ama dhimasho.
- Caruurta aan la talaalin iyo naagaha uurka leh waxay ku sugan yihiin dhibaatooyin aad khatar ah ee keena jadeecada.
- Haddii ay jiaan xaalad la xaqiijiyay ee jadeeco ah oo ka jirta dugsiga, qof kasta ee si dhowaansho lala xiriirey oo aan la tallaalín waa inuu galaa **go'doon 21 maalmood**.

## Qaamo-qashiirta:

- Qaamo-qashiirta waa xanuun aad u faafa waxaana lagu gartaa **bararka qoorta & jilicsanaanta**.
- Calaamadaha fudud ee qaamo-qashiirta waxa ka mid noqon kara qandho, madax xanuun, jidh xanuun, daal iyo cunto xumo.
- Dhibaatooyinka halista ah ee qaamo-qashiirta waxaa ka mid ah caabuqa xiniinyaha ee wiilasha, iyo ugxaan-sidaha gabdhaha - tani **waxay keeni kartaa dhibaatooyinka ugxaanta** ee nolosha dambe iyo sidoo kale maqal beel.

## Jadeeco jarmal:

- Jadeeco jarmal waxay dadka badidooda keentaa calaamado fudud sida finan, qandho, daal, sanko oo duuf ah iyo caabuqa isha. Waxay keeni kartaa calaamado halis ah.
- Haddii qof uur leh uu ku dhaco jadeeco jarmal waxay sababi kartaa in ilmuhu uu dhinto, ama uu ku dhasho cilladaha indhaha, maqal-la'aan, dhibaatooyinka wadnaha, dhibaatooyinka koritaanka iyo arrimo kale oo caafimaad oo halis ah.

**Koorsada buuxda ee tallaalka MMR waa 2 qiyaasood - mana aha wax lala daahdo in la qaado!**

**Tallaalka MMR ee aan lahayn Gelatin ayaa la heli kara**

Si aad ilmahaaga u sameeyso balan tallaalka, iskaan ka qaado QR si aad u buuxiso foomka oggolaanshaha, ama la xidhiidh dhaqtarkaaga [GP]

Foomka oggolaanshaha



Haddii aadan hubin in ilmahaagu qaatay tallaalka MMR, ka xaqiiji ee diiwaanka caafimaadka shakhsi ahaaneed ee ilmahaaga (buugga cas) marka ugu horreysa. Haddi aadan weli hubin khiyaaroyin kale waxaa ka mid ah

- La xiriirinta Kooxda Caafimaadka Caruurta ee Xaafada 029 218 3626 or 029 218 36929
- La xiriirinta Xarunta Dhaqtarkaaga guud